**SUMMAD: DD/JSS/SPD/028/2017** **DATE: 29/11/2017**

**KU: WASAARADDA ISBOORTIGA IYO DHALINYARADA EE DOWLADDA FEDERALKA SOMALIA**

Og: Wasaaradaha Dhalinyarada iyo Isboortiga ee Dowlad goboled yada- xubnaha ka ah Dowladda Federal ka ee Somalia

Og: Madaxwaynaha Dowlad goboleedka Jubbland

Og: Raysul wasaaraha Dowladda Fedelka ee Somalia

Og: Madaxwaynaha Dowladda Federalka Somalia

**UJEEDO: DIB USOO CELIN GOGOSHII CIYAARHA DOWLAD GOBOLEED YADA IYO GOBOLKA BENADIR UDHAXAYSAY EE LAGU QABAN LAHAA MAGALADA KISMAAYO .**

Mudane wasiir, waxaan si xushmad iyo xurmadi ku jirto ugu soo celinaynaa, adiga iyo dhamaan hay'adaha kale ee qaranka ee ku shaqada leh, meel marinta abaabulidda iyo qabashada tartanka ciyaaraha heer qaran, gogoshii aan idin waydiisannay ee aad nagu sharaften, in ciyaaraha dalka lagu qabto dowlad goboleedka jubbland, sababaha soo socda awgood:

1) kadib markaan qiimayn dheer kusamaynay , garoonka ay ka dhici lahaayeen ciyaaraha ee magaalada kismaayo , oo ay dhamays tirmi waayeen lix ( 6) qaybood oo muhim u ah qabashada ciyaaraha oo aan ku dhamays tirmi Karin muddada loo qabtay qabashada ciyaaraha , markaan latashannay ingineerada iyo farsamo yaqaannadii gacanta kuhayay dhismaha garoonka .
2) markaan qiimaynay kharashka ( budget ka ) dhaqaale ee ay u baahan tahay howshaan baaxadda way n, ee lagu maamuli lahaa arimaha ciyaaraha sida : deegaanka , amaanka, gaadiidka, caafimaadka iyo abaal marinada kaleba .
3) kadib markii laheli waayay, balan qaadyo dhaqaale oo horay ujiray, hadana suuragal ahayn in lahelo wakhtiga oo nasoo guda galay awgiis.

Ayaa waxaan go'aan sannay inaan dib ugu soo cellino wasaaradda , gogoshii qabashada ciyaaraha , waxaana imaanaynaa meelkasta oo laysku af garto in lagu qabto ciyaaraha , oo wasaaradda isboortiga iyo ciyaaruhu go'aamiso insha allah. Ugu danbayn tii, waxaan u

mahadcelinayaa wasiirka wasaaradda dhalin yarada iyo isboortiga Xildhibaan **marwo khadiijo maxamed diiriye** , dowrka hogaamineed iyo howl karnimo ee ay ku hogaaminayso is fahanka iyo iskaashiga wada shaqayneed ee u dhaxeeya wasaaradda dhalinyarada iyo isboortiga ee fadaraalka iyo wasaaradaha dhalinyarda iyo isboortiga ee Dowlad goboleedyada xubnaha ka ah dowladda dhexe iyo gobolka benaair

**MAHADSANID**

**Madax-wayne kuxigeenka koobaad**

**Dowlad goboleedka jubbaland**

**H.E. Maxamud Sayyid Aden**

**Aqalka madax tooyada – kismayo- jubbaland Somalia**

**E-mail: deputy-president1@jubalandsatate.so**